Kaalmada dhaqaalaha

Kaalmada masruufka iyo nolosha sideeda kale

Warbixin aasaas ah /kaalmeen wada hadal

Xaq u lahaanshada kaalmada

Dhammaan bulshada joogto degmada oo haysan si kale ey ku xaliyaan baahidooda waxey xaq u leeyihiin kaalmada dhaqaalaha oo masruufka noloshooda iyo noloshooda sida kale. Kaalmada waxaa lagu tijaabin baahidaada oo waxaa kuu soo diri Guddiga bina'aadamka[Humanistiska nämnden].

"cutubka 4aad . Xaqa kaalmada dhaqaalaha

1 § Qofka aan baahidiisa xalinkarin ama si kale ku xalinkarin wuxuu xaq u leeyahay kaalmada dhaqaalaha oo guddiga adeega bulshada bixiyo oo masruuf noloshiisa iyo noloshiisa kale."

Maxaa la iiga baahanyahay?

Anaga waxaa ADIGA kaa rabnaa inaa inta awoodada ah suubisid oo sidaa noloshaada isku masruufi laheed iyo dhaqaalo daradada oo ku meelgaarka u xalin laheed.

Haddii aad shaqo la'aan tahay waa inaa na tusinkartid inaa si joogto ah shaqo u raadisid, oo waraaqada qorsheynt horumarinta shaqsiga ka keentid xafiska shaqada[arbetsförmedlingen].

Adiga waa inaa codsataa lacagaha/gunnooyinka kale oo xaqa u lahaan kartid. Tusaale ahaan lacagta qasnada shaqo la'aanta[a-kassa], alfa, kaalmada kirada guriga[bostadsbidrag] ama wax kale.

Markaa soo codsaneysid kaalmada dhaqaalaha waxaa adiga soo raacisaa waraaqaha caddeynaayo dhaqliga ku soo galo iyo dhaliga bixisid, oo tusaale ahaan waraaqada mushaarka, waraaqada canshuurta[skattsedel] iyo kobi xisaab xirka canshuurta[självdeklarationen].
Heshiiska kirada, waraaqada bixinta kirada iyo rasiidka kiro bixinta, ceymiska guriga, ogeysiinta qarashka daryeelka carruurta iyo qarashka ururka shaqaalaha iyo haddii aad jirantahay caddeynta inaa jiran tahay.

Ilaa intee oo lacag baa heli kara aniga?

Sida ku qoran sharciga adeega bulshada dhammaan waxa xaq u wada lee nahay nolol suurtagal ah. Waxa nolol suurtagal ah lagu qiimeyn oo looga tusaale qaadan xeerka qaranka. Xeerka qaranka dhammaan wadanka oo dhan buu ka wada dhaxeeyaa oo wuxuu ka tusaale qaadan baaritaanka guud oo qiimaha wax lagu iibsado. Sida xeerka ku qoran lacagta oo adiga xaqa u lahaaneysid waxey ku xirantahay inta qof oo qoyska tihiin, qarashka kirada iyo carruurta da'dooda. Markaa kuu xisaabineyno lacagta waxaa ka nusqaamineynaa wixii dhaqli oo ku soo galo canshur kadib.

Dhaqligii ku soo galo laga nusqaamin kaalmada

Lacagta kaalmada waxa laga nusqaamin dhaqliyada ku soo galo canshuur kadib, tusaale ahaan
* Lacagta shaqo la'aanta[A-kassa/ALFA]
* Lacagta carruurta iyo inta dheerida
* kaalmada kirada guriga iyo xitaa haddii dib lagaaga soo diro
* Lacagta gunnada waalidka
* Lacagta dulsaarka nolosha/ceymis
* Mushaar/mushqaayad
* Lacagta hawlgabka/lacagta bukaanka/lacagta gunnada oo dadka aan shaqeyn karin
* Lacagta magdhow oo la siiyo dadka jirran
* Canshuur celin
* Lacagaha kaalmeenta oo waxbarashada
* Lacagta kaalmeynta oo la siiyo carruurta hal waali la nool
* Lacagta kaalmada oo dheerida
* lacagta taageerida hawlaha firfircoonida

Maxaa loo qorsheyay iney deeqdo kaalmada?

Lacagta kaalmada waa iney kuu deeqdaa qarashkaan:

* cuntada	* dharka & kabaha	* waxyaabaha la is la isticmaalo
* ciyaar & baashaal	* cafimaadka & nadaafinta	* joornaalka
* telefoonka	* Qarashka tviga	* kirada
* korontada guriga	* safarada shaqada	* ceymiska guriga
* a-kassa	* qarashka ururka shaqaalaha	* ceymiska carruurta

Kaalmada dhaqaalaha waa iney xitaa kuu deeqdaa qarashyada marmarka dhifka sanadkiiba laguu soo diro, tusaale ahaan qarashka telefoonka & joornaalka.

Kaalmada nolosha sideeda kale

Kaalmada dhaqaalaha marmar qaas ah waxaa xitaa lagugu caawin qarashka daryeelka carruurta, okiyaale, daryeelka ilkaha, daryeelka isbitaalka, daawo, alaabta guriga iyo wixii lamid ah oo sabab leh.

Intaan waxaa idiin sii dheer fursad aad ku soo codsankartiin qarash adiga/adinka ama carruurta aad baahi u qabtiin.

Xeerka xisaabinta qaaska – XIISO KORDHIN SHAQO

Ujeedada xiiso kordhin shaqo baa ah in ey qofka dan ugu jirtaa inuu shaqo bilaabo ama sacadaha shaqada badsado markuu qaadanaayo lacagta kaalmada dhaqaalaha.

Qofkii oo qaadanaayay kaalmada dhaqaalaha muddo lix bilood oo isku xigto wuxuu xaq u leeyahay inuu haysto boqolkiiba 25 mushaarka oo laga ma nusqaaminaayo xaqa kaalmada dhaqaalaha.
Xeerkaan xisaabinta qaaska waxaa lagu dhaqmi muddo labo sano. Markaas kadib waa in qofka uu fuliyaa shuruuda oo ah waa in qofka qaadanaayay lacagta kaalmada muddo lix bilood oo isku xigto si oo hadana loogu xisaabiyo xeerka xisaabinta qaaska.

Degmada Örnsköldsvik waxey kala ey go'aamiyeen xiiso kordhin shaqo oo qaas u eh dhallinyarada oo ka yar 25 sano. Taasna waxey ku quseeyn laga soo bilaabo codsiga koowad, oo ma lahan shuruud waqti, oo mushaar ilaa 2000 kr waxbo laga ma saameynaayo kaalmada dhaqaalaha.

Anaga waxaa shuruud kaaga dhigikarnaa tababar

Anaga waxaa kugu dhihi karnaa waa inaa shaqo tababar ama meherad aqoontaada kordhiso waa inaa ka qeyb-qaadataa sidaa kuu siino kaalmada dhaqaalaha.
Anaga waxa shuruud kaaga dhigeynaa inaa adiga ka qeyb-qaadato tababar shaqo haddii aad shaqo kugu habboon heli weeyso ama meherad shaqo raadin.

Tababar shaqo waa inuu ahaado mid aqoon kordhin oo adiga kuu suurtagalinaayo inaa shaqo hesho. Markii laguu diraayo tababar shaqo ama meherad adiga aqoontaada kordhiso waxaa la fiirin adiga waxaa rabtid iyo xaalada aad ku sugantahay. Haddii aad sabab la'aan ama aan ansaxsaneen diido inaa ka qeyb-qaadato tababar shaqo ama meherad adiga aqoontaada kordhiso waxaa laga nusqaamin ama laga joojin kaalmada dhaqaalaha.

* kaalmada dhaqaalaha la siiyo waalidka haayo canug naafo qeybta canshuurta
* lacagaha hawlgabka oo la kala dhaho AFA, SPV iyo KPA

Nidaamka oo codsiga kaalmada dhaqaalaha

Foomka codsiga oo si sax loo soo buuxiyay baa na loo keeni.

↓

Baaritaan &
Qorsho shaqo

↓

Xisaabin:
Xeerka lacagta laga jaray
Dhaqaalaha ku soo galo= Kaalmada dhaqaalaha

↓

Go'aan:
Oggolansho ama diidmo

↓

Haddii oggolansho:
Lacagta baa laguu soo diri

Dib u soo celin

Anaga waxaa kugu qasbi karnaa inaa lacagta kaalmada dib u soo celisid haddii tusaale ahaan laguu siiyay inaa soo celisid ama sababahaan kale oo hoostaan midkood:
*Marka dhaqaalaha ama lacagaha ku soo galo kaa soo daaho
*Marka dadka iyo shaqo bixiyaha ey is khilaafsanyihiin
*Shuruuda tahay inaa dib u soo celisid lacagta
*Sababto tahay warbixin dhameystirneen ama warbixin qalad
*Lacag qaldan ama in aad u badan

Kaalmo oo noocyo kale

Xaqa kaalmada oo degmada ma quseeyo kaliya kaalmada dhaqaalaha. Waxey kale ey xitaa ahaan kartaa caawinaad ama adeeg daryeel ama adeegyada kale oo bulshada lagu kaalmeeyo, tusaale ahaan talo bixinta dhaqaalaha, daryeelka guriga, qof aad xiriir la lahaatid ama ku soo noolaatid guryaha dadka lagu daryeelo.

Oggolansho in warbixintaada la soo baarikaro

Maadaama kaalmada dhaqaalaha ey ku xirantahay baahidaada waa in koow baaritaan la suubiyo oo ku saabsan caawinaada aad u baahantahay. Markaa foomka codsiga saxiixdo waxaad ansaxin in xafisyada kale ey la xiriirikaran. Anaga xafiisyo kale ma la xiriireyno adigoo koow noo oggolaan.

Adiga waa ka dacwoonkartaa

Haddii codsigaada oo lacagta kaalmada iyo kaalmada nolosha diidmo laga siiyo waxa xaq u leedahay inaa go'aanka ka dacwoodid.

Warbixinta ku saabsan kaalmada dhaqaalaha, kaalmada sida xeerka qaranka iyo sidaa uga dacwoonkartid go'aan waxaa ka heli gacanhayaha.

Daryeelida warbixinta shaqsiga

Xafiiska adeega shaqsiga waxey isticmaalan kombiyuutaro markey warbixinta shaqsiga daryeelaayaan. Warbixinta ey daryeelaayaan waa magaca, lambarka aqoonsiga iyo ciwaanka, baaritaanka iyo go'aanka arrinta, qoralka arrinta quseeyo oo wixi laguu qabtay, dhaqliga ku soo galo iyo warbixin ku saabsan caafimaadkaada iyo haddii loo baahanyahay in baaritaano kale la suubiyo ama daryeel ubaahantahay.

Qarsoodi, waajibka aamusnaanshada

Adiga waxaa ku difaacayo sharciga qarsoodida marka anaga nala hadleyso.

Taasna micnaheeda waxey tahay in dhammaan shaqaalaha qabanaayo waajibka aamusnaanshada iyo warbixinta aad noo soo gudbisid inaan loo gudbin qof aan ku shaqo leheen.

<u>Meesha nagala soo xiriireyso</u>

Magaca gacanhayaha……

Ciwaanka bostada……

Lambarka telefoonka……..

Saacada telefoonka…..……..

Sida ku qoran Sharciga adeega bulshada:

” Qofka aan baahidiisa xalinkarin ama si kale ku xalinka-rin wuxuu xaq u leeyahay kaalmada dhaqaalaha oo gud-diga adeega bulshada bixiyo oo masruuf noloshiisa iyo noloshiisa kale sida ku qoran cutubka 4 qeybta1 §. ”

”Guddiga adeega bulshada wuxuu ka codsankara qofka kaalmada dhaqaalaha la siiyo inuu muddo ka qeyb-qaato meesha guddiga uu u diro tababar shaqo ama meherad u kordhineyso aqoonta, waa haddii qofka shaqsiga uu ka qeyb-qaadankarin meheradaha xafiska shaqada…”

ÖRNSKÖLDSVIKS KOMMUN